

# Sida Aan u Isticmaalno Macluumaaadkaada Shakhsiga

**Iskaashi ay mas'uul ka tahay Waaxda Shaqada iyo Horumarka Dhaqaalah Minnesota  
(Minnesota Department of Employment and Economic Development) (DEED) iyo**

*Fadlan akhri Ogeysiiska hoose iyo Ogeysiiska in Sinaanta Fursadda Tahay Sharciga ee ku yaala dusha. Marka aad dhameysid in aad akhrisid, waxaad xarfaha hore magacaada ku qortaa labada oraah ugu dambeeyso, ku daabac magacaada, kaddibna taariikhda ku qor dhanka hoose foomkaan.*

Marka aad adeegyo ka heshid barnamijyada gobolka ama federaalka maalgeliyo, waxaan ku weydiin doonaa macluumaaad ku saabsan naftaada. Xogta aan kaa codsaneyno in aad ka bixisid naftaada waxaa loo haystaa in ay tahay xog gaar ah sida ku qoran [Sharciga Minnesota \(Minnesota Statute\) 13.47 qeybta hoose 2](#). Si loo aruuriyo loona isticmaalo xogtaan, waa in aan kuu sheegno sababta aan ugu baahanahay xogta, sida aan ku talo jirno in aan u isticmaalno, iyo natiijo kasta oo laga yaabo in aad la kullantid haddii aad bixisid macluumaaadka ama haddii aadan bixinin. Waxaad diidi kartaa in aad bixisid qaar ama dhamaan macluumaaadkaan. Sharci ahaan, lagaama rabo in aad bixisid macluumaaad kugu saabsan adiga. Hase ahatee, haddii aadan naftaada ka bixinin macluumaaad ku filan, taasi waxay xaddidi kartaa awoodda aan u leenahay in aan ku siino adeegyo. Waxaa dhici karto in macluumaaadkaada lala qeybsado hay'adaha kale ee dawladda ee sharci ahaan xaqa u leh xogtaan sida Waaxda Shaqaalahaa Mareykanka (U.S. Department of Labor), Xafiiska Tacliinta Sare (Office of Higher Education), Xafiiska Xisaabiyaha Sharci Dajinta (Office of the Legislative Auditor), Xisaabiyaha Gobolka (State Auditor), bixiyeyaasha adeegga shaqada iyo tababarka, iyo wakaaladaha ceydha. Waxaa kaloo dhici karto in macluumaaadkaada lala wadaago cid kale haddii maxkamadda ammarto. Si aad u heshid macluumaaad badan oo ku saabsan [Dhaqanka Xogta DEED \(DEED Data Practices\)](#), booqo <http://mn.gov/deed/about/what-guides-us/privacy>.

## Noocyada macluumaaadka shakhsiga ee laga yaabo in lagu weydiyo iyo sababta aan ugu baahanahay:

- Nambarka Soshal Sekuritiga (SSN):** Waxaa la codsanaa nambarkaada SSN si laguu aqoonsado in aad tahay qof gaar ah, si loo helo xogta mushaarka, iyo si ay noogu kaalmeeyso qiimeyn taqabano;
- Magaca, cinwaanka, taariikhda dhallashada, iyo macluumaaadka lagala xariiro:** Tani waxaa loo isticmaalaa in lagu aqoonsado, lagula xariiro iyo la qiimeeyo shaqada aan qabano;
- Da'da, qofka waxa uu yahay lab/dhedig, jinsiyadda, isirk, itaal darrida, iyo xaaladda dhaqaalah:** Waxaa la aruuriyaa macluumaaadka tirada dadka taasoo kaalmo ka geysata haddii aad xaq u leedahay kaalmo dheeraad ah iyo si loo qiimeeyo shaqada aan qabano;
- Xaaladda Qofka Ka Soo Shaqeeyay Ciidamada:** Waxaa la weydiyaa xaaladda qofka ka soo shaqeeyay ciidamada si loo ogaado haddii aad xaq u leedahay mudnaanta adeegyada iyo si loo qiimeeyo shaqada aan qabano; iyo
- Macluumaaadka kale ee qofka, sida diiwaanka dugsiga, xirfadaha shaqada iyo taariikhda shaqada:** Waxbarashada iyo taariikhda shaqada waxaa loo isticmaalaa qorsheynta shaqadaada iyo ujeedooyinkaada tababarka iyo si loo qiimeeyo shaqada aan qabano.

## Macluumaaadka kugu saabsan adiga waxaa loo isticmaali doonaa:

- In go'aan laga gaaro haddii aad xaq u leedahay adeegyada, adeegyada aad xaq u leedahay kuwa ay yahiin, iyo in leysku dabarido adeegyada lagu siiyo;
- In laguugu kaalmeeyo in aad heshid shaqo marka taariikhda shaqada iyo waxbarashada lala wadaago loo-shaqeeyeyaasha rajada laga qabo; iyo
- Horumarinta adeegyada dadweynaha marka la kala dhigdhigo xogta ku saabsan sida aan shaqada u qabano.

Aniga waan akhristay Ogeysiiska kor ku qoran. Waan fahamsanahay in ay dhici karto in macluumaaadka lala wadaago wakaaladaha kele ee bixiya adeegga sida waafaaqsan Sharciga Dhaqanka Xogta Dawladda Minnesota (Minnesota Government Data Practices Act).

Aniga waan akhristay Ogeysiiska Sinaanta Fursadda tahay Sharciga (Equal Opportunity is the Law Notice) (ee kuna qoran dhinaca dusha). Waxaan fahamsanahay in aan xaq u leeyahay in aan soo gudbiyo ashtakada takoorka.

# FURSAD SIMMAN WAA SHARCIGA

Sharciga ayay ka soo horjeedaa helitaankaan caawinta dhaqaalaha Faderaalka oo lagu takoorayo boosaska xiggo: waxay ka soo horjeedo shaqsi walba oo joogo Mareykanka, oo ku saleysan jinsiyada, midika, diinta, jinsiyada (oo ay ku jiraan uurka, dhalashada canuga, iyo xaalandaha caafimaadka ee la xiriirto, fikrada galmada, heerka labeebka, iyo aqoonsiga jinsiga), asalka dhalashada (oo ay ku jiraan aqoonta Ingiriiska xadidan), da'da, curyaannimada, ama ka mid ahaanshaha siyaasada ama aaminadaadaha, ama, ka soo horjeedo ka faa'ide walba, codsadaha, ama ka qeybqaadanayo barnaamijyada dhaqaale ahaan loogu caawiyay sida waafaqsan Title I ee Xeerka Fursada Shaqaalaha Cusub iyo Fursada, oo ku saleysan heerka muwaadinnimada shaqsiga ama ka qeybqaadanayo WIOA walba barnaamijka lagu caawiyay dhaqaale ahaan Title I ama howsha.

Helaha waa inuusan ku takoorin kuwa walba ee aagaga: go'aansanayo cida laga diiwaangelinayo, ama geleysa, barnaamijka WIOA ee lagu caawiyay dhaqaale ahaan Title I ama howsha; siineyso fursadaha gudaha, ama ula dhaqmayo qof walba ee aan laga eegin, barnaamij noocaas ama howsha; ama sameynta go'aamada shaqaaleysiinta ee maamulka, ama la xiriirto, barnaamij noocaas ah ama howsha.

Helayaasha caawinta dhaqaalaha faderaalka waa inay qaadaan tallaabooyin macquul ah oo lagu hubinayo in xiriirada shaqsiyaadka qaba curyaannimada ay u wax ku oolyihii sida xiriirada dadka kale. Tani waxay la micna tahay in, xiliga codsiga oo lacag la'aan ku ah shaqsiga, helayaasha waxaa looga baahanyahay inay bixiyaan gargaarka dheeraad ku haboon iyo adeegyada shaqsiyaadka u qalma ee qaba curyaannimada.

## WAXA LA SAMEEYO HADDII AAD AAMINSANTAHAY INAAD LAKULANTAY TAKOORID

Haddii aad u maleysay in laguugu sameeyay takoorida sida waafaqsan barnaamijka WIOA lagu caawiyay dhaqaalaha Title I ama howsha, waxaad ku xareyn kartaa cabashada gudaha 180 maalmood ka bilow taariiqda xadgudubka eedeynta ah ee midkood: Sarkaalka Fursada Simman (ama qofka helaha u xilsaaray ujeedadaan);

**Fursada Simman ee Deegaanka (EO) Sarkaalka:**

**WIOA EO Sarkaalka:** Karen Lilledahl, DEED, xafiiska Kala duwanaanshaha iyo Fursada Simman, Dhismaha Bangiga Qaranka 1aad, 332 Minnesota Street E200, St. Paul, MN 55101, 651-259-7089 (Codka), 651-297-5343 (Fakis),  
[Karen.Lilledahl@state.mn.us](mailto:Karen.Lilledahl@state.mn.us)

**Gobolka EO Sarkaalka:** Heather Stein, DEED, Xafiiska Kala duwanaanshaha iyo Fursada Simman, Dhismaha Qaranka 1aad, 332 Minnesota Street E200, St. Paul, MN 55101, 651-259-7097 (Cod), 651-297-5343 (Fakis), [heather.stein@state.mn.us](mailto:heather.stein@state.mn.us)

**Agaasimaha, Xarunta Xaqquqaha Madaniga (CRC), Waaxda Shaqada Mareykanka (U.S. Department of Labor) 200 Constitution Avenue NW, Room N-4123, Washington, DC 20210**

ama koronta ahaan sida loogu tilmaamay websaydka CRC ee [www.dol.gov/crc](http://www.dol.gov/crc).

Haddii aad ku xareysid cabashadaada helaha, waa inaad sugtaa midkood illaa helaha sameeyo Ogeysiin qoran ee Tallaabada Ugu dambeysa, ama illaa 90 maalmood ayaa dhaaftay (mid walbo degdega ah), ka hor inta aan lagu xareynin Xarunta Xaqquqda Rayidka (firi ciwaanka kore). Haddii helahaan uusan ku siinin Ogeysiin Quran ee Tallaabada Ugu dambeysa oo gudaha 90 maalmood ee maalinta aad ku xareysay cabashadaada, waxaad ku xareyn kartaa cabasho CRC ka hor inta aadan heli Ogeysiintaas. Si kastaba, waa inaad ku xareysaa cabashadaada CRC gduaha 30 maalmood ee dhammaadka waqtiga 90- (micnaha kale, gudaha 120 maalmood kadib maalinta aad ku xareysay caabshada helaha). Haddii helaha uu ku siiyo Ogeysiin qoran ee Tallaabada Ugu dambeysa ee cabashadaada, laakin aadan ku qanacsaneyn go'aanka ama xalinta, waxaad cabasho ku xareyn kartaa CRC. Waa inaad ugu xareysaa cabasho CRC gudaha 30 maalmood ee taariqda aad heshay Ogeysiinta Go'aanka Ugu dambeeyo.